

Xeerka 29 Agoosto 1957, lamba. 32

Iqtisaaska Kormeeraha Shaqada oo loo wareejiyay Wasaarada Arrimaha Bulshada

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba.1 “Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya”;
Marka uu arkay Dekereetda 18 Maajo 1956, lamba. 78 “ Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya”;

Marka uu arkay Amarka lamba. 21 ee 23 Nofember 1951 “Dhismaha Kormeeraha Shaqada” iyo 23 Nofember 1951, dhismaha Xaafiisyada Shaqada;

Marka uu arkay Dekereetda 145 ee 1 Disember 1951, Dhismaha Xaafiisyada Shaqada;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo inta laga soo saarayo Xeerka Shaqada in loo xilsaaro si ku meelgaara, Wasaaradda Arrimaha Bulshada, awoodaha qaarkood oo horay loogu wareejiyay Kormeeraha Shaqada;

Marka uu arkay tala soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Bulshada;

La dhagaystay Golaha Wasiirada;

WUXUU DEKEREETO KU SOOSAARAYAA:

Qod. 1

Waxaa loo wareejiyay Wasaaradda Arrimaha Bulshada – Waaxda Shaqada – dhammaan arrimaha ay horay u hayay kormeeraha Shaqada.

Qod. 2

Xaafiiska Shaqada ee ku yaalla Degmada Muqdisho wuxuu ka tirsanaanayaa Wasaaradda Arrimaha Bulshada – Waaxda Shaqada – marka laga reebo iqtisaaska ku xusan qod. 2 ee Amarka 23 Nofember 1951, lamba. 22.

Qod. 3

Hawlqabadka xilalka ku xusan qod. 5 ee Amarka 23 Nofember 1951, lamba. 21 waxaa si ku meelgaara loo wakiishay Guddoomiyaha Gobolka Banaadir wixii ku siman iqtisaaskiisa dhuleed.

Qod. 4

Sharci kasta oo ka soo horjeeda xeerkaan waa naqilay.

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.

P. Maamulaha

P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Cali Jimcaale Baraale

La hubiyay lana diiaangeliya – Diw. lamba. 4 – bogga lamba. 162.

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**